

## Hagaajinta caanaha (Neocate Infant DHA/ARA®)

### Maxaan ugu baahanahay inaan hagaajiyo kalooriyeyaasha ku jira caanaha ilmahayga?

Neocate Infant® waxaa loo sameeyaa dhallaanka xasaasiyadda qaba ama u baahan dawo ay u fududahay inay dheefshiidaan. Nafaqadani waxay inta badan ka kooban tahay 20 kalori halkii wiiyadood, laakiin dhallaanka qaarkood waxa laga yaabaa inay u baahdaan heer kaloriyo ka duwan si ay u helaan miisaanka saxda ah.

### Sideen isku daraa caanaha?

1. Gacmaha si fiican ugu dhaqo saabuun iyo biyo. Dhaq dusha sare ee qasacadda caanaha formula ka hor inta aadan furin si aad uga ilaaliso in jeermisku u gudbo masaasadda. Isticmaal weelasha cabbiraadda oo nadiif ah iyo weel.
2. U daa biyaha tuubada qabow inay socdaan 2 daqiiqo ka hor inta aanad ku darin caanaha si aad u nadiifisid biyaha fadhiya tuubooyinka. Biyaha ceelka waxa ku jiri kara bakteeriyo mana aha in loo isticmaalo samaynta caanaha dhallaanka.
3. Fiiri shaxda cunto karinta ee ku taal gadaasha xaashidan. Isticmaalka koob cabbirka dareeraha cad, cabbir qiyaasta biyaha la rabo. Meel siman dhigo koobka wax lagu cabbiro, oo adigoo gaarsiinaya indhaha iska hubso heerka caanaha.
4. Ku dar cabirka budada caanaha ee aan baakadaysan ee heerka biyaha. Isticmaal qaado oo kaliya ee ku jirta qasacadaha caanaha ama koobabka cabbirka ee loogu talagalay maaddooyinka engegan.
5. Isku qas ama si fiican u rux ilaa ay burooyinku ka baxaan.

### Ilaa intee ayaan sii haysan karaa caanaha?

Ku kaydi caanaha la diyaariyey weel daboolan qaboojiyaha. Tuur caanaha la diyaariyey ee aan la isticmaalin 24 saacadood ka dib.

Tuur caanaha budada ah ee aan la isticmaalin hal bil kadib markaad daasadda furto.

### U diyaargarowga quudinta ilmahaaga

1. Si fiican u rux caanaha.
2. Diiri caanaha adiga oo dhalada ku dhejiya biyo diiran.  
  
**Ha samayn** isticmaal microwave-ka sababtoo ah waxay u kululaataa si aan sinnayn, taasoo keenta "dhibacyo kulul" oo gubi kara afka ilmaha.
3. Diirinta ka dib, rux dhalada mar kale. **Had iyo jeer** tijaabi heerkulka caanaha ka hor quudinta.
4. Tuur caanaha ee ku haray dhalada ilmaha quudinta ka dib.

## Neocate Infant DHA/ARA® Shaxda cunto karinta

Kalooriyada halkii wiqiyadood	Biyo	Budada formula (heer, aan aad u buuxin)	Qiyaas ahaan mugga ugu dambeeya
☐ 20	3 wiqiyadood	3 qaado	3½ wiqiyadood
	4 wiqiyadood	4 qaado	4½ wiqiyadood
	5 wiqiyadood	5 qaado	5½ wiqiyadood
	16 wiqiyadood	⅓ koob + ¼ koob	18 wiqiyadood
	27 wiqiyadood	1 koob	30 wiqiyadood
☐ 22	4½ wiqiyadood	5 qaado	5 wiqiyadood
	5½ wiqiyadood	6 qaado	6 wiqiyadood
	8 wiqiyadood	9 qaado	9 wiqiyadood
	11 wiqiyadood	⅓ koob + 3 qaado	12½ wiqiyadood
	16 wiqiyadood	½ koob + 4 qaado	18 wiqiyadood
	29 wiqiyadood	1 koob + 3 qaadada shaaha ah	32½ wiqiyadood
☐ 24	2½ wiqiyadood	3 qaado	3 wiqiyadood
	5 wiqiyadood	6 qaado	5½ wiqiyadood
	10 wiqiyadood	⅓ koob + 3 qaado	11½ wiqiyadood
	13 wiqiyadood	½ koob + 2 qaado	15 wiqiyadood
	17 wiqiyadood	½ koob + ¼ koob (ama ¾ koob)	19 wiqiyadood
	23 wiqiyadood	1 koob + 1 qaado	26 wiqiyadood
☐ 26	3 wiqiyadood	4 qaado	3 ½ wiqiyadood
	6 wiqiyadood	8 qaaddo	7 wiqiyadood
	10 wiqiyadood	½ koob	11 ½ wiqiyadood
	20 wiqiyadood	1 koob	23 wiqiyadood
☐			

1 Qaadada miiska ah = 3 qaadada shaaha ah

### Su'aalo?

Haddii aad na weydiineyso wax su'aalo ah, la soo xiriir qeybta Adeegyada Nafaqada ee isbitaalka saacadaha maalintii.

### Children's – Minneapolis

612-813-6865 ama 612-813-6960 (NICU)

### Children's – St. Paul

651-220-5678